FAALLO KOOBAN

# WASAARADAHA ARRIMAHA GUDAHA EE FEDERAALKA IYO DOWLAD-GOBOLEEDYADA SOOMAALIYA: SIDA LOO SUURTAGELIN KARO KA QAYBGALKA DADWEYNAHA EE CADAALADDA XILLIGA KALA-GUURKA

Sanado badan oo colaado iyo xasillooni-darro ah kadib, Soomaaliya waxay galeysaa xilli ay suuragal tahay in cadaaladda xilliga kala-guurka la hirgeliyo. Khibrad soddon sano oo Afrika ah waxa ay muujineysaa in geeddi-socodka cadaaladda xilliga kala-guurka uu u badan yahay inuu noqdo mid guuleysta haddii uu salka ku hayo ka qaybgalka shacabka, gaar ahaan dhibbanayaasha iyo bulshooyinka ay colaaduhu saameeyeen.

Inkastoo dowlada Soomaaliya aysan weli dhisin guddi runta, sidoo kalena aanay sameynin maxkamadeyn, magdhowyo, ama habab kale oo rasmi ah oo badanaa la xiriira xal-u-helidda dhacdooyinkii hore, haddana noocyo kala duwan oo tallaabooyin ah ayaa ka soo ifbaxay dalka kuwaas oo hordhac u ah – ama xataa noqon kara noocyo ka mid ah – cadaaladda xilliga kala-guurka.

*Siyaasadda Cadaaladda Xilliga Kala-guurka ee Midowga Afrika waxay cadaaladda xilliga kala-guurka ku qeexday "hababka siyaasadeed ee kala duwan (kuwa rasmi ah iyo kuwa dhaqameed ah ama aan rasmi ahayn) iyo habraacyada hay'adeed kuwaasoo bulshooyinka, iyada oo loo marayo geeddi-socod talo wadaag ah oo loo dhan yahay, ay qaataan si ay uga gudbaan xadgudubyadii hore, kala qaybsanaantii iyo sinnaan la'aantii, ayna u abuuraan jawi horseeda isbeddel ammaan, dimuqraadi iyo mid dhaqaale-bulsho." Siyaasaddani waxay u oggolaanaysaa ka qaybgalka dadweynaha ee dhammaan marxaladaha cadaaladda xilliga kala-guurka.*

Iyadoo casharro laga barannayo tallaabooyinka rasmiga ah ee ay dowladdu sameysay, sida Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka, iyo tallaabooyinka aan rasmiga ahayn ee ay bulshada rayidka hormuudka ka tahay, sida Madasha Nabadda iyo Horumarka, warbixintan waxay bixineysaa talooyin wax-ku-ool ah oo ku saabsan sida ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-uheshiisiinta iyo Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada uga shaqeyn karaan sidii loo suuragelin lahaa ka qaybgalka dadweynaha si loo suurageliyo geeddi-socod cadaaladeed oo ku habboon Soomaaliya sidoo kalena waara.

## Ballaarinta Ka-qeybgalka iyadoo Lagu Dhisaayo Hababkii Horay u Shaqeeyay

Ka qaybgalka waa in uu qeexo dhammaan geeddi-socodka cadaaladda xilliga kala-guurka. Ballaarinta ka qaybgalka waxay ka dhigan tahay in laga dhigo ka qeyb galka xudunta geeddi-socodka cadaaladda xilliga kala-guurka bilow ilaa dhammaad, iyadoo la tixgelinayo tallaabooyin kala duwan iyo muddada fog.

Marka bulshadu ay si mideysan u hesho fursad, marin iyo agab ay si dhab ah uga qayb-qaadato qorsheynta, naqshadeynta, hirgelinta iyo dabagalka cadaaladda xilliga kala-guurka, geeddi-socodku wuxuu yeelanayaa sharciyad iyo taageero ballaaran.

Mid ka mid ah hababka la hubo ee lagu xaqiijin karo ka qaybgal dhab ah oo Soomaaliya ku habboon waa in lagu dhiso hawlaha iyo hababka horey loo tijaabiyay oo ay si ballaaran u aqbaleen bulshada. Hababkaas iyo dadka hirgeliya waxay abuurayaan shabakado, aqoon iyo fursado ka qaybgal oo lagu xoojin karo sidii lagu heli lahaa cadaalad xilliga kala-guurka oo waafaqsan duruufaha maxalliga ah loona dhan yahay.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ayaa durba ka faa'iideysanaysa hababkii horey u jiray, kaddib markii dowladda federaalku ay sanadkii 2019 ansixisay Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka si wax looga qabto taariikhda adag iyo colaadaha sii socda ee Soomaaliya. Si loo gaaro yoolalka cadaaladda xilliga kala-guurka, sida xalinta tabashooyinkii hore, dib-u-heshiisiinta bulshada, iyo kordhinta kalsoonida lagu qabo hay'adaha dowliga ah, Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka wuxuu doortay in uu isticmaalo hab cadaalad-dhaqameed Soomaaliyeed oo ay ka qaybgalayaashu ku kalsoon yihiin, sida bixinta magdhow ama "diyo" marka qof la dilo. Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka waxa uu sidoo kale qaadayaa talaabooyin dhaqameed si muhiimadda loo saaro in loo dhanyahay ayna ka qeybgalaan qeybaha kala duwan ee bulshada iyo kooxaha aan inta badan laga qeyb gelinin oo ay ku jiraan dumarka iyo dhalinyarada.

Intaa waxaa dheer, Soomaaliya waxay leedahay geeddi-socodyo badan oo ay hogaamiyaan bulshada rayidka ah, kuwaasoo lagu dhisi karo hababka cadaaladda xilliga kala-guurka. Hal tusaale ayaa ah Madasha Nabadda iyo Horumarka oo la sameeyay 2017-kii si wax looga qabto sababaha colaadda gobolka Mudug, gaar ahaan Gaalkacyo, sidoo kalena la dhiirageliyo is-dhexgalka bulshooyinka iyo beelaha. Madasha Nabadda iyo Horumarka waxay ka kooban tahay wakiillo ka tirsan qeybaha kala duwan, sida waxbarashada, caafimaadka, ganacsiga, iyo warbaahinta, kuwaasoo si dhow ula shaqeeya qeybaha kala duwan ee bulshada, sida haweenka, dhallinyarada, culimada, iyo odayaasha dhaqanka, si loo hormariyo nabadda iyo cadaaladda iyada oo loo marayo dhexdhexaadinta khilaafaadka, toddobaadka nabadda, wacyigelinta, iyo hindisayaal kale. Mid ka mid ah guulaha muhiimka ah ee Madasha Nabadda iyo Horumarka ayaa ahayd in ay kaalin wayn ka qaadatay baabi'inta qadka cagaaran ee kala qeybin jiray bulshada Gaalkacyo.

Iyadoo laga duulayo tusaalayaashan, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib-u-heshiisinta iyo wasaaradaha arrimaha gudaha ee dowlad-goboleedyada waxay xoojin karaan hababka rasmiga ah ee cadaaladda xilliga kala-guurka iyadoo wax laga baranayo hababka aan rasmiga ahayn, lana kaashanaayo si ay u helaan aqoonta, xiriirrada, iyo marinnada ka qaybgalka. Sidoo kale, dowladda waxay aqoonsan kartaa hababka aan rasmiga ahayn inay yihiin habab cadaaladda xilliga kala-guurka ah iyadoo siinaysa taageero iyo maalgelin si ay qaab madax-bannaan ugu shaqeeyaan iyagoo ku dhammaystiraya hababka rasmiga ah ee dowladda. Qaabkaan, dowladu waxa ay ka fogaaneysaa dhaliilaha uga imaan kara isticmaalka hannaan isku mid ah waxa ayna hormarinaysaa qaabab cusub oo ka qaybgalka cadaaladda xilliga kala-guurka ah ee Soomaaliya.

*i*

*Faalladan kooban waxay ku saleysan tahay cilmibaaris la sameeyey intii u dhaxeysay Nofeembar 2023 iyo Abriil 2024 oo lagu wareystay 114 mas'uuliyiin oo heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ah, hay'ado badan oo caalami ah, wakiillo bulshada rayidka ah, dhibbanayaal/ka badbaadeyaal colaadihii dhacay, iyo daneeyayaal kale oo muhiim ah oo ku sugan Muqdisho, Dhuusamareeb iyo Gaalkacyo. Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo talooyin, booqo bogeena mashruuca* ***From Partnership to Participation: Multilateral Engagements with Transitional Justice in Africa****.*

## La-shaqeynta Ururada Bulshada Rayidka ah

Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka iyo Madasha Nabadda iyo Horumarka waxaa labaduba door hogaamineed ku leh bulshada rayidka ah. Bulshada rayidka ah waxay si firfircoon uga shaqeeyaan heer bulsho, iyaga oo adeegsanaya habab iyo dhaqammo jira si ay u daboolaan baahiyaha cadaaladda xilliga kala-guurka. Ereyga 'bulshada rayidka ah' ee Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay ururrada aan dowliga ahayn ee xuquuqda aadanaha, ururrada ka shaqeeyo heer bulsho, culimada diinta, hoggaamiyeyaasha dhaqanka, ganacsatada, ururrada haweenka, ururrada dhallinyarada iyo noocyada kale ee ururrada muwaadiniinta.

Jilayaasha bulshada rayidka ah waxay ka shaqeeyaan in ka qeybgalka muhiimadda la saaro, iyaga oo adeegsanaya aqoontooda, shabakadahooda, iyo howlahooda. Waxay muhiim u arkaan sidii cadaaladda xilliga kala-guurka qaab maxalli ah looga dhigi lahaa, si loo hubiyo in ay waafaqdo baahiyaha maxalliga ah iyo fahamka cadaaladda. Sidoo kale, waxay muhiim u yihiin sidii loo daadejin lahaa cadaaladda xilliga kala-guurka, iyaga oo la shaqeynaya bulshooyinka si loo horumariyo xalal maxalli ah oo xaqiijinaya in geeddi-socodku uu u furan yahay ka qaybgal ballaaran oo matalaya qaybaha kala duwan ee bulshada.

Hoggaamiyeyaasha diinta iyo dhaqanka oo ah dhex-dhexaadiyeyaal lagu kalsoon yahay oo xididdo adag ku leh bulshada ayaa door muhiim ah ka ciyaara sidii looga gudbi lahaa kala qaybsanaanta beelaha loogana shaqeyn lahaa xalinta tabashooyinkii hore. Hoggaamiyeyaasha diinta waxay isticmaalaan mabaadi'da shareecada si ay u dhexdhexaadiyaan khilaafaadka beelaha ayna nabadda uga faafiyaan masaajidyada, iskuullada, iyo goobaha ay isugu yimaadaan bulshada. Hoggaamiyeyaasha dhaqanka waxay adeegsadaan tallaabooyin cadaalad dhaqameed, sida xeerka, si ay u xaqiijiyaan ka qaybgalka furan ee geeddi-socodyada wada-xaajoodka, dhexdhexaadinta, iyo garnaqidda, iyada oo xalka lagu saleynayo wadar-oggolka qabiilka.

Inkastoo ay la kulmaan caqabado ka dhashay caadooyin ragga u xaglinaya, haddana ururrada haweenka ayaa sidoo kale ah kamid ah jilayaasha ugu muhiimsan bulshada rayidka ah ee Soomaaliya. Haweenku waxay ku guuleysteen inay joojiyaan dagaallo iyagoo isu dhigay oo dhex galay dhinacyada dagaallamaya xilliyada uu socdo dagaalka iyagoo lulayey maro cad oo calaamad nabadeed ah. Haweenku waxay sidoo kale soo bandhigeen fikrado dhaqameed sida "dhab-u-heshiisiin" oo lagu daray geeddi-socodyada nabad-dhisidda, kuwaas oo si tartiib ah u helaya taageero heer qaran ah.

*Hordhaca Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka wuxuu leeyahay, "Colaadda daba-dheeraatay ee Soomaaliya waxay burburisay isku-xirnaantii bulshadeenna iyo midda qaranka, laakiin soo-kabasho waa suurtagal. Dib-u-heshiisiin qaran oo dhamaystiran oo ku saleysan dhaqanka Soomaaliyeed, qaababka nabad-dhisidda ee Islaamka, casharradii laga bartay waayo-aragnimadii hore iyo sidoo kale meelo kale oo adduunka ah ayaa hadda looga baahan yahay Soomaaliya oo dhan haddii dalka uu doonayo inuu dhiso mustaqbal ammaan ah."*

Inkastoo dhalinyaradu inta badan la iska indho tiro, haddana waxay leeyihiin awood ay ku keenaan xalal iyo habab cusub oo lagu hormarinayo ka qaybgalka cadaaladda. Tusaale ahaan, dhalinyarada ka tirsan Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka ayaa adeegsanaya baraha bulshada si ay ugu faafiyaan farriimaha nabadda. Mid ka mid ah farriimahooda muhiimka ah ee ay adeegsadaan waxaa kamid ah oraah uu yiri nabad-u-ololeeye Elman Cali Axmed: "Qoriga dhig, qalinka qaado."

Inkastoo ay la kulmaan caqabado iyo dhibaatooyin, haddana bulshada rayidka ah ee Soomaaliya waa saaxiibo muhiim u ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Federaalka iyo wasaaradaha heer dowlad-goboleed si ay u suurtageliyaan ka qaybgalka dadweynaha ee cadaaladda xilliga kala-guurka ee rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, taasoo xaqiijinaysa in dadweynuhu aqbalaan.

## Talooyin

Halkii banaanka laga keeni lahaa habab cadaaladda xilliga kala-guurka ah ama si billow ah loo abuuri lahaa, Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee heer federaal iyo wasaaradaha arrimaha gudaha ee dowlad-goboleedyada waxay ka faa'iideysan karaan awoodda iyo aqoonta qaniga ah ee ku dhex jirta Soomaalida. Talooyinkan waxay soo jeedinayaan tallaabooyin cad cad oo lagu hormarinayo ka qaybgalka dadweynaha, gaar ahaan dhibbanayaasha/ka badbaadayaasha colaadaha iyo bulshooyinka ay saameeyeen, si loo horumariyo geeddi-socod cadaalad xilliga kala-guurka ah oo waarta kuna habboon duruufaha maxalliga ah, kuna saleysan tallaabooyin rasmi ah iyo kuwa aan rasmi ahaynba.

### *Ka qeybgal macno leh oo ay hormuud ka yihiin dad maxalli ah*

- Qiimeyn iyo ku celcelin in lagu sameeyo fikradaha iyo erayada sida isla-xisaabtan, run-sheeg, magdhow, dib-u-habeyn, iyo dib-u-heshiisiin ee dalka si ay u noqdaan aasaaska lagu dhisayo habka cadaaladda xilliga kala-guurka.

- In la tixgeliyo hababka iyo dhaqamada jira – tallaabooyinka ku saleysan hab-nololeedka bulshada, xeeladaha ay isticmaalaan odayaasha dhaqanka, mabaadi'da shareecada, iyo kuwa kale – kuwaas oo ay bulshada Soomaaliyeed aqbalayaan sidoo kalena waa in la sameeyo shabakado iyo dhaqaale lagu dhisi karo cadaaladda xilliga kala-guurka oo ka qaybgal leh. Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka wuxuu iftiiminayaa casharro ku saabsan hababka lagu aqoonsanayo noocyada geeddi-socodyadaas.

- La shaqeynta tiro ballaaran oo bulshada rayidka ah oo lagu kalsoon yahay oo matali kara dhibbanayaasha/ka badbaadayaasha colaadaha, kuwaasoo aan ku koobneyn kaliya hay'adaha aan dowliga ahayn laakiin ay sidoo kale ka tirsan yihiin hoggaamiyeyaasha diinta, hoggaamiyeyaasha dhaqanka, ururrada heer deegaan ka shaqeeya, haweenka, wakiillada warbaahinta, ganacsatada, iyo kuwa kale. Madasha Nabadda iyo Horumarka ayaa tusaale u ah qaadashada aragtida ballaaran ee bulshada rayidka kuwaasoo fure u ah dib-u-heshiisiinta.

- In taageero dhaqaale iyo mid kaleba la siiyo tallaabooyinka jira iyo kuwa cusub ee aan rasmiga ahayn, iyada oo lagu darayo hababka cadaaladda xilliga kala-guurka ee rasmiga ah si ay marin ugu noqdaan ka qaybgalka ama in lala saaxiibo iyagoo ah dadaallo gaar ah balse dhammaystiraya.

- Hubinta matalaadda beelaha kala duwan, bulshada magaalooyinka iyo kuwa miyiga, jinsiga, da'da, qaybaha bulshada, iyo wixii la mid ah, oo ay ku jiraan kooxaha la takooro iyo qurba-joogta.

- Sare-u-qaadista ka qaybgalka dhalinyarada iyo ururrada dhalinyarada si loo xoojiyo aragtidooda, looga faa'iideysto xirfadahooda, loona hormariyo wada-shaqeynta jiilasha. Ka qaybgalka firfircoon ee cadaaladda xilliga kala-guurka wuxuu dhalinyarada tusin karaa muhiimadda ay leedahay in uu muwaadinku noqdo mid firfircoon oo ka shaqeeya arrimaha khuseeya. Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaranka wuxuu muujinayaa doorka wanaagsan ee dhalinyarada marka ka qeybgaleyaasha firfircoon lagu daro.

- Sare-u-qaadista ka qaybgalka haweenka iyo ururrada haweenka iyaga oo la siinayo xaquuq la mid ah odayaasha dhaqanka. Inkastoo ay jirto iska caabin dhaqan, haddana dowlad-goboleedyadu awood bay u leeyihiin inay haweenka u aqoonsadaan ka qaybgalayaal firfircoon. Guusha haweenka ee joojinta dagaallada iyo dadaallada nabadda ee Gaalkacyo waxay muujinayaan qiimaha ay leedahay in la taageero.

- U sameynta sanduuqyo magdhow odayaasha beelaha ee Gaalkacyo, si ay si rasmi ah ugu soo gabagabeeyaan heshiiskii 2017, kaas oo xeerinaya in dhinacyadu aysan dalban magdhow dambiyadii dhacay ka hor sanadkaas, sidaasna lagu joojiyo dilalka aargoosiga ah.

- Dhisidda adeegyada taageerada caafimaadka maskaxda iyo nafsiyeed ah ee muddada-gaaban iyo muddada-fog iyada oo lagu darayo barnaamijyada caafimaadka maskaxda hababka

cadaaladda xilliga kala-guurka ee rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, muddo ka dibna loo dhisayo shabakad adeegyadan ka bixisa dalka oo dhan. Ka qaybgalayaasha taageerada ka helaya la tacaalidda murugadooda ayay u badan tahay in ay muddada-fog ka qaybqaataan cadaaladda xilliga kala-guurka iyo dib-u-heshiisiinta.

- Diiradda in la saaro dhisidda xiriirrada lala yeelanayo daneeyayaasha dhinacyada badan – oo ay ku jiraan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka, dowladaha deeqaha bixiya, hay'adaha samafaleyaasha, iyo ururrada caalamiga ah ee aan macaash-doonka ahayn – kuwaas oo bixiya maalgelin muddo-dheer socota iyo lahaanshaha maxalliga ah ee heerka sare oo lagu horumarinayo laguna hirgelinayo cadaaladda xilliga kala-guurka.

- Hirgelinta Siyaasadda Cadaaladda Xilliga Kala-guurka ee Midowga Afrika si ay u hagto horumarinta cadaaladda xilliga kala-guurka ee Soomaaliya, gaar ahaan qodobbadooda cusub ee ku saabsan ka qaybgalka iyo maaraynta kala-duwanaanshaha.[1]

### *Abaabulidda dhibbanayaasha iyo ka badbaadayaasha colaadaha*

- In taageero nidaamsan la siiyo dhibbanayaasha/ka badbaadayaasha colaadaha si ay uga caawiso in ay ka qayb qaataan geeddi-socodka cadaaladda xilliga kala-guurka. Inkastoo dalabaadkoodu kala duwanaan karaan, haddana ka qaybgalka dhibbanayaasha/ka badbaadayaasha colaadaha waa furaha geeddi-socod wax-ku-ool ah.

- In la taageero abuurista kooxo u dooda dhibbanayaasha/ka badbaadayaasha colaadaha, tusaale ahaan, iyadoo la siinayo goob shirar, adeegyo taageero maskaxeed iyo nafsiyeed ah, iyo fursadaha dhisidda awoodda. Howlaha Madasha Nabadda iyo Horumarka waxaa ku jira casharro ku saabsan sida loola macaamilo bulshooyinka ay saameeyeen colaadaha iyada oo loo marayo wadahadallo joogto ah iyo taageero wax-ku-ool ah.

- Tixgelinta baahiyaha iyo mudnaanta kala duwan ee dhibbanayaasha/ka badbaadayaasha colaadaha magaalooyinka iyo miyiga. Magaalooyinka, mudnaanta waxaa laga yaabaa inay tahay soo celin ama magdhaw hanti, halka miyiga ay noqon karto wadaagga kheyraadka.

- Adeegsiga hannaan oggolaansho xog-ogaal ah si loo maareeyo filashooyinka, iyadoo la caddeynayo in ka qaybgalka mar walba uu yahay mid mutadawacnimo ah iyo in faa'iidooyinka ama adeegyada ka soo baxa geeddi-socodka aysan ku xirnayn ka qaybgalka.

### *Qorsheyn iyo naqshadeyn*

- Taageer ka qaybgalka ballaaran ee naqshadeynta, halkii la qaabeyn lahaa wadatashiyada kaddib marka naqshadda la sameeyo. Wadatashiyada Qaab-dhismeedka Dib-u-heshiisiinta Qaran oo ay ka qaybqaateen 1,000 ka qeybgale ayaa laga baran karaa casharro ku saabsan guulaha iyo caqabadaha nooca ka qaybgalkan.

- In tixgelin gaar ah la siiyo ka qaybgalayaasha laga yaabo in la il-duufo, tusaale ahaan, iyadoo wax laga qabanayo caqabadaha ku saleysan jinsiga (sida waqtiyada oo la waafajiyo baahiyaha daryeelka carruurta iyo daryeel kaleba); hubinta taageerada dadka naafada ah (tusaale ahaan, goobaha laga dhigo kuwa lagu gaari karo kuraasta naafada, turjumaadda luqadda calaamadaha, iwm.); iyo tixgelinta kuwa ku hadla afafka aanay dadka intiisa badan ku hadlin iyo kuwa aan akhris-qoraalka aqoon.

- Daadejinta hirgelinta cadaaladda xilliga kala-guurka si loo fududeeyo gaaritaanka meelaha ka baxsan magaalooyinka. Guusha guddiyada nabadda ee degmooyinka iyo gobollada qaar ee

1 African Union, Transitional Justice Policy (2019), 4, **https://au.int/sites/default/files/documents/36541-doc-au_tj_policy_eng_web.pdf**; African Union, Roadmap for the Implementation of the African Union Transitional Justice Policy (2020), **https://au.int/sites/default/files/documents/41242-doc-Roadmap_for_the_Implementation_of_AU_ENGLISH_Sep_091.pdf**.

Soomaaliya waxay muujinaysaa qiimaha daadejinta.

- Hirgelinta miisaaniyad ka qeybgal, iyadoo dadka deegaanka ay aqoonsanayaan tirada ka qaybgalayaasha, baahidooda iyo dalabyadooda. Madasha Nabadda iyo Horumarka waxay muujisay inkastoo bulshooyinku ay soo saari karaan qaar ka mid ah dhaqaalaha, laakiin geeddi-socodyada waara waxay u baahan yihiin ilo maalgelin oo la isku halayn karo.

- Daabicidda qorshe isuduwid cad oo ku saabsan dadaallada cadaaladda xilliga kala-guurka ee dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada.

### *Hirgelin iyo dabagal*

- Hubinta in kooxaha fulinta ee tallaabooyinka cadaaladda xilliga kala-guurka ay yihiin kuwo matalaaddooda loo dhan yahay. Tusaale wanaagsan waxaa ah guddiga odayaasha dhaqanka ee Gaalkacyo.

- Taageeridda helitaanka hindisayaasha iyo geeddi-socodyada iyada oo loo marayo xalal iyo waddooyin maxalli ah. Kartida hoggaamiyeyaasha diinta ay si nabad ah ugu dhexgalaan beelaha iska soo horjeeda waxay muujinaysaa muhiimadda ay leedahay la shaqeynta dhexdhexaadiyeyaal lagu kalsoon yahay.

- Joogteynta diirad-saarista hirgelinta iyo isla-xisaabtanka. Bulshooyinka ay saameeyeen colaadaha badanaa waa ay niyad-jabaan haddii heshiisyada aan la fulin, ama aysan waqtigooda ku dhicin, ama dambiilayaasha aan weli lala xisaabtamin.

- Kahor inta aan la shaacin siyaasad, warbixin kama dambeys ah, ama wax-soo-saar kale oo la xiriira cadaaladda xilliga kala-guurka, in la qabto aqoon-is-weydaarsiyo xaqiijin ah oo lala kaashanayo bulshada rayidka ah ee heer deegaan oo dalka oo dhan ah, si loo hubiyo jawaab-celin ballaaran iyo aqbalaadda bulshada.

### *Dib-u-habaynta hay’adaha*

- Xoojinta iyo dib-u-habeynta hay’adaha dowladda si loo hubiyo caddaalad iyo hufnaan marka la wajahayo dambiyada taariikhiga ah. Tani sidoo kale waxay muhiim u tahay wax ka qabashada dambiyada sii socda sida boobka dhulka ee magaalooyinka iyo dhaca xoolaha ee miyiga.

- Meelaha ay suuragalka tahay, hubinta in masuuliyiinta dowladda ee loo xil saaray la shaqeynta tallaabooyinka cadaaladda xilliga kala-guurka ay ku sii nagaadaan xilalkooda, si loo hubiyo sii socoshada iyo u hoggaansanaanta go’aannada la isku raacay, iyo in ay sameeyaan hab wareejin dhammeystiran marka ay xilka ka tagayaan.

- Mudnaanta in la siiyo dib-u-habeynta dhaqan-dhaqaale iyo hormarka si wax looga qabto sababaha asaasiga ah ee khilaafaadka Soomaaliya iyo ka hortagga soo noqoshadooda. Siyaasadda Cadaaladda Xilliga Kala-guurka ee Midowga Afrika waxay bixinesaa hagitaan ku saabsan horumarinta caddaaladda dhaqan-dhaqaale.

- Manhajka waxbarashada dalka in lagu daro mabaadi’da cadaaladda xilliga kala-guurka, xuquuqda aadanaha, iyo masuuliyadda muwaadinka.

## MAHADCELIN

Faalladan kooban waxaa qoray Bobuin Jr Valery, Farxiya Maxamuud, Jasmina Brankovic, iyo Simon Robins.

Mashruucan waxaa taageeray Machadka Nabadda ee Maraykanka (United States Institute of Peace) oo u marsiiyay deeqda mashruuca “Reinvigorating Multilateral Conflict Prevention and Peacebuilding.” Aragtida, natiijooyinka, iyo gunaanadka ama talooyinka lagu soo bandhigay faalladan waxa ay u gaar yihiin qorayaasha, mana ka turjumayaan aragtida Machadka Nabadda ee Maraykanka.

## KU SAABSAN CENTRE FOR THE STUDY OF VIOLENCE AND RECONCILIATION

Centre for the Study of Violence and Reconciliation (CSVR) waa hay'ad madax-bannaan oo aan dawli ahayn oo laga aasaasay Koonfur Afrika 1989. CSVR waa machad arrimo kala duwan ka shaqeeya oo doonaya inuu fahmo sidoo kalena ka hortago rabshadaha, bogsiiyo saameynta colaadaha islamarkaana dhiso nabad waarta oo bulshada dhexdeeda ah, heer qaran iyo heer gobolba. Annaga oo u mareyna cilmi-baaris, u doodista iyo taageerada nafsiga ah ee bulshada, sidoo kalena la kaashaneyno bulshooyinka ay saameeyeen rabshadaha, waxaan isku howlnaa inaan kor u qaadno la xisaabtanka dowladaha, kor u qaadno sinnaanta jinsiga iyo dhisidda wadajirka bulshada, isdhexgalka iyo muwaadinimada firfircoon.

## KU SAABSAN SOMALI PUBLIC AGENDA

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad madax-bannaan oo aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan. SPA waxay rumeysan tahay in dhammaan shacabka Soomaaliyeed ay mudan yihiin helista adeegyo dadweyne oo tayo leh sida waxbarasho, daryeel caafimaad, guriyayn, amni, iyo caddaalad oo lagu bixiyay hannaan daah-furan ayna bixiyaan hay'ado dowladeed oo lala xisaabtami karo.

35 YEARS

CSVR
Centre for the Study of Violence and Reconciliation
Working towards peaceful, equal and violence-free societies since 1989

SOMALI PUBLIC AGENDA


**NALA SOO**

**CSVR**
33 Hoofd Street
Braampark Forum 5, 3rd Floor
Johannesburg, 2001
South Africa
Tel: +27 (11) 403 5650
Fax: +27 (11) 339 6785
Email: info@csvr.org.za
**www.csvr.org.za**

**SPA**
Mogadishu
Somalia
Tel: +252 (0) 85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
**www.somalipublicagenda.org**



© 2025 Centre for the Study of Violence and Reconciliation and Somali Public Agenda



Designed and typeset by COMPRESS.dsl | 800971C | www.compressdsl.com